ICRC

SOOMAALIYA

# XAQIIQYINKA IYO TIROOYINKA

JANAAYO – LUULYO 2021



## FUDUDEYNTA HELITAANKA DARYEELAKA CAAFIMAADKA



- **282,550** oo bukaan ah ayaa ka faa'iideystay barnaamijka Daryeelka Caafimaadka Aasaasiga ah oo ka dhacay **29** xarun caafimaad.
- **10,534** bukaan ayaa lagu daweeyay barnaamijka nafaqo ku daweynta bukaan socodka.
- **15,529** oo baaritaano ah ayaa ka dhacday qolalka gargaarka deg-degga ah ee **4** isbitaal oo ay ICRC-du taageerto.
- **2,944** bukaan ayaa daryeel ka helay labada xarumood ee dajinta xaaladaha bukaannada ee Baydhabo iyo Kismaayo.
- **167** oo ah ka faa'iideystayaasha barnaamijka daryeelka caafimaadka aasaasiga ah ayaa loo gudbiyay isbitaallo xaalad deg-deg aha awgeed ama si ay u helaan daryeel gaar ah iyada la bixiyay qarashka gaadiidka isbitaalka lagu geeyay.

## KA JAWAABIDDA CUDURKA SHUBAN BIYOODKA BA'AN EE DILLAACAY

- **21,085** qof ayaa ka qeyb galay kulamada kor u qaadidda caafimaadka, iyada oo **883** oo guri la booqday si loo siiyo xog ku saabsan ka hortagga shuban biyoodka.
- **471** qof ayaa looga daaweeyay shuban biyoodka daran xarumaha caafimaadka SRCS.

## BANNAAMIJKA DHAQAN CELINTA JIRKA

- **3,209** ayaa loo sameeyay barnaamijka dhaqan celinta jirka.
- **233** oo ah qeybaha jirka oo aartifishal ah, **614** qalabka xubnaha jirka kaalmeeya ah, **484** qalabka socodka kaalmeeya iyo birahanaafada iyo **105** kuraasta dadka naafada ah iyo qalabka fadhiga ama istaagga lagu saxo ah ayaa la gaarsiiyay **3** xarumood oo ay SRCS ku leedahay Muqdisho, Gaalkacyo iyo Hargeysa.
- **7,292** oo ah kulamo fiiso tarabiyo ah ayaa la qabtay.

## BARNAAMIJKA GARGAARKA GEG-DEGGA AH

- In ka badan **1,240** dhaawacyo xabadeed ah, dad xanuunsan iyo kuwo dhaawacyo kale qaba ayaa la caawiyay.
- **2,356** qoys ayaa qaatay tababarka gargaarka deg-degga ah.
- **2,231** mtatadawiciin ah ayaa lagu tababaray gargaarka deg-degga ah.

**KA JAWAABIDDA COVID-19**

- Fariimaha ka hortagga caabuqa Covid-19 ayaa si maalinle ah looga baahiyay **12** idaacadood oo wadanka oo dhan ah Apriil ilaa Juun 2020.
- **224** mutadawiciin SRCS ka tirsan iyo **154** shaqaalaha caafimaadka ah oo ka tirsan xarumaha daryeelka caafimaadka aasaasiga ah ayaa lagu tababaray fariimaha ka hor-tagga Covid-19; **85** shaqaalaha caafimaadka ah oo ka shaqeeya isbitaallada Madina, Keysaneey, Beydhabo iyo Kismaayo ayaa la tababaray sidoo kale.
- **14,576** kulamada kor u qaadista caafimaadka ah ayaa la gaarsiiyay in ka badan **103,756** qof oo jooga Banaadir, Jubada hoose, Gedo, Hiiraan, Shabeellada hoose, Shabeellada dhexe, Galgaduud iyo gobollo kale; **4,133** kulamo ah ayaa lagu qabtay isbitaallada, iyada oo la gaarsiiyay **33,994**oo qof.
- Meelaha kala saaridda iyo hubinta oo buukanada lagu baaro ayaa laga sameeyay **29** xarumaha daryeelka caafimaadka aasaasiga ah, halkaas oo shaqaalaha SRCS iyo mutadawiciin kale loo tabaray in ay caawiyaan barnaamijka kormeerka bulshada iyo dabagalka bukaanada.
- Tababar ku saabsan shaqada iyo shaqaalaha, xakameynta caabuqa, maareynta xaaladaha, isticmaalka qalabka ilaalinta shaqsiyadeed (PPE), ayaa la siiyay isbitaallada Baydhabo, Kismaayo iyo Keysaneey, waxaa sidoo kale la siiyay qalab caafimaad, daawo iyo qalabka ilaalinta shaqsiyadeed.

***KORMEERKA:***

- Isugeyn **205** ka faa'iideystayaasha Daryeelka Caafimaadka Aasaasiga ah (PHC) ee adeegyada SRCS-ta ayaa la baaray si loo xaqiijiyo dhaqangalinta isbitaal u gudbinta iyada oo **45%** oo ah (**92**) la xaqiijiyay u gudbinta isbitaalka iyo bixinta qarashka gaadiidkal.
- Qiimeyn lagu sameeyay **07** rugaha caafimaadka guur guura iyo **03** rugaha caafimaadka aan guur guurin oo ku yaalla Bartamaha Koofurta Soomaaliya si loo ogaado hab shaqeyntooda, howsha ay hayaan, tayada iyo ku habboonaanta rugaha guur guura, iyo sida ay howsha u wadaan sadexda xarumood oo aan guur guurin kuwaas oo aysan ICRC-du si toos ah u kormeerin. Xarumaha/kooxaha caafimaadka ee guur guura waxa ay booqdaan **40** xaafadood oo ku yaalla Baardheere (**2** MHT), Ceel Waaq, Dhuusamareeb, Ceel buur, Afgooye iyo Mandheera halka rugaha caafimaad ee aan guur guurin ay ku yaallaan Bardaale, Qansaxdheere, iyo Baydhabo iyo Jalalaqsi oo ka tirsan gobolka Hiiraan.

## FUDUDEYNTA HELITAANKA BIYO NADIIF AH IYO ADEEGYADA NADAAFDDA

- **37,297**qof ayaa ka faa'iideysta **10** nidaamyada biyaha ah oo bixinaya biyo nadiif ah.
- **20** Farsamayaqaan oo ka tirsan Hey'adda Horumarinta Biyaha Puntland ayaa la siiyay qalab dhameystiran oo ay ku jiraan qalab koronto.



- **3** ka mid ah shaqaalaha Hey'adda Horumarinta Biyaha Puntland ayaa Machadka biyaha ee Kenya waxa uu ku tababaray sida loo taxliiliyo tayada biyaha dhulka.
- **61,860** ka faa'iideystayaal ah oo ku nool **12** xaafadood oo ka tirsan Balad Xaawo ayaa fursad u helay biyo nadiif ah oo la cabi karo oo ay la socoto dar-dargalin xagga nadaafadda ah oo sconeysa muddo **3** todobaad ah ka dib isku dhacyo iyo barakac bulshada soo wajahay.
- Howlo wax lagu dayac tirayo si loogu fududeeyo kooxda isbitaallada Keysaneey iyo Kismaayo in ay dayac tiraan qalabka muhiimka ah, sida: matoorka, mashiinka bullaacadaha nadiifiya, hagaajinta nidaamka tamarta ayaa la dhaqan galiyay.

**KA JAWAABIDDA CAABUQA COVID-19**

- **98** mutadawiciin SRCS ka tirsan ayaa bixiyay farriimo lagu hormarinayo nadaafadda, farriimo looga hortagayo Covid-19, iyaga oo sidoo kalena ugu deeqay saabuun iyo koloriin in ka badan **316,020** dadka deegaanka ah iyo barakacayaasha ku nool, Dhoobleey, Balad Xaawo, Beydhabo, Afgooye, Beledweyn, Cadale iyo Balcad.
- **3,410** maxbuus oo ku jira **10** xabsi oo ku yaalla daafaha Soomaaliya iyo Soomaaliland ayaa la siiyay saabuun iyo agab nadaafadeed oo ay la socoto kor u qaadista nadaafadda iyo ka hortagga caabuqa Covid-19. Guddiyada nadaafadda maxaabiista ayaa sidoo kale dib loo howlgaliyay.

## BIXINTA KAALMADA DARYEELKA DEG-DEGGA AH, SOO CELINTA HAB-NOLOLEEDKA IYO DHISIDDA AWOODDA ADKEYSIGA

- **190,020** qof ayaa helay deeqo lacageed oo ujeedo badan intii lagu jiray xaaladaha deg-degga ah.
- **21,377** oo ah caruurta ka yar **5** sano iyo **6,813** dumar uur leh ama nuujinaya ayaa ka qeyb galay barnaamijka quudinta dheeriga ah waxaana la siiyay dawooyinka kala ah (plumpy sup and CSB plus) sida ay u kala horreeyaan.
- **564** qof ayaa lagu caawiyay deeqaha soo kabashada beeraha.



- **594** ayaa lagu caawiyay lacago iyada sidoo kale la siiyay qalab ay ku shaqeystaan.
- **303,126** qof ayaa la siiyay jawaanada ciidda si ay uga hortagaan daadadka.
- **6,726** qof ayaa la siiyay waxyaabaha la beero iyo tababarro ku saabsan abuurka aasaasiga ah iyo soosaarka calafka
- **1,415** maxaabiis iyo ilaaliyeyaal ah ayaa la siiyay qoondo cunto oo Ramadaanka loogu talo galay.
- Isugeyn **274,020** qof ayaa loo diwaan galaiyay barnaamijyada kaalmada iyo hab-nololeedka oo ay ku jiraan dad la siiyay lacago kaash ah ama kaalmo u dhiganta ayaa waxaa xaqiijiyay Waaxda Maareynta Dhibaatada (RMU).

*KORMEERKA:*

- Isugeyn **34,416** qof ayaa loo diwaan galaiyay barnaamijyada kaalmada iyo hab-nololeedka oo ay ku jiraan dad la siiyay kaalmo kaash ah ayaa la xaqiijiyay.

## ILAALINTA DADKA RAYIDKA AH



- ICRD-du wax ay diiwaan galisay kiisaska eedeymaha ku saabsan xadgudubyada Sharciga Caalamiga ah ee bani'aadamnimada iyada oo ka doodday si qarsoodi ah oo laba geesood ah oo ujeedkeedu yahay in laga ilaaliyo dadka rayidka ah dhibaatooyinka ka dhasha colaadaha hubeysan iyo rabshadaha.
- **5** farriimood oo kor loogu qaadayo helitaanka adeegyada daryeelka caafimaadka aan xadidneyn iyo amniga xarumaha daryeelka caafimaadka iyo shaqaalaha ayaa **105** jeer laga sii daayay idaacadda aagga Kismaayo laga bilaabo Diseembar 2020 ilaa Janaayo 2021.
- Farriimo muhiim ah oo kor luugu qaadayo daryeelka caafimaadka ayaa lagu qoray darbiyada isbitaalka Keysaneey.
- Caawimaad lacageed ayaa la siiyay **09** kiis si loo caawiyo **61** qoys si ay uga soo kabtaan dhibaatooyinka gaarka ah ee ka soo gaaray colaadaha iyo rabshadah
- **08** qoys ayaa loo aqoonsaday barnaamijka dhaqaale abuurka loo sameeyay si ay noloshooda dib ugu bilaabaan.

## HAGAAJINTA XAALADDA NOLOLEED EE MAXAABIISTA IYO IN SI WANAAGSAN LOOLA DHAQMO

- ICRC-du waxa ay booqatay **2** goobood oo maxaabiis lagu hayo oo ay ku jiraan **1,143** maxaabiis ah si loo qiimeeyo xaaladooda nololeed iyo sida loola dhaqmo. **25** ka mid ah maxaabiista ayaa si gaar gaar ah loola socday loona booqday.
- **623** oo maxaabiis ah ayaa la siiyay qalabka nadaafadda iyo casharro ku saabsan nadaafadda **3** goobood oo ka mid ah meelaha maxaabiista lagu hayo sanadkq 2021 oo dhan.
- Alaabta cuntada ayaa loogu deeqay **2** goobood oo ay ku jiraan isugeyn **1,415** oo ay ku jiraan ilaaliyeyaal.
- **2** booqasho oo gaar ah ayaa lagu tagay **1** xabsi si loo la kulmo madaxda xabsiga si ay looga la hadlo qorshaha ay ICRC-du ku taageereyso dhismaha jiko iyo foorno loogu dhisayo xabsiga loona ogolaado qorshaha xabsiga loogu talo galay. Booqashada ayaa sidoo kale ujeedkeedu ahaa in la sameeyo qiimeyn xagga biyaha ah maadaama ay jiraan cabashooyin laga qabo dhanaanka biyaha xabsiga.

**KA JAWAABIDDA CAABUQA COVID-19**

- **2,354** oo isugu jira maxaabiis iyo shaqaalaha xabsiga oo **9** xabsi ka kala socday ayaa la siiyay saabuun qubeys iyo saabuunta dharka lagu dhaqdo, oomo, meelaha gacmo-dhaqashada, xirmooyin ah qalabka ilaalinta shaqsiyadeed iyo waliba qalab kale oo kala duwan sida gaari gacammo, badeello iyo xaaqimmo, caagagga qashinka iwm.
- In ka badan **2,449** af-xir iyo **39** xabo oo gacmo-gashi ah ayaa la siiyay mas'uuliyiinta xabsiga.
- Deeqo la xiriira Covid-19 ayaa la siiyay **5** xabsi dhexe oo ka kooban **8** dharka shaqada ah, **37** oo gacmo-gashi ah, **415** maaskarad qaliinka ah, iyo xirmo qalabka caafimaadka aasaasiga ah oo dabooleysa baahida **1,023** maxbuus muddo **9** bilood ah.
- **5** talooyin qoraal ah ayaa lala wadaagay mas'uuliyiinta heer fadaraal iyo dhammaan dowladaha xubnaha ka ah tallaabooyinka ka hortagga faafitaanka caabuqa iyada oo la ixtiraamayo maxaabiista sharaftooda bani'aadamnimo.

## SOO CELINTA XIRIIRKA QOYSKA (RFL)

- ICRC-da ayaa gacan ka geysatay soo celinta xiriirka xubnaha qoyska iyada oo taageero ka heleysa SRCS-ta waxaana la is dhaafsaday **65,481** farriimaha Laanqeyrta Cas ah (RCMs), fududeynta **53,841** wadahadal taleefoon ah, adeegyada dabagalka oo gacan ka geystay in la helo **88** qof iyo baahinta **2,433** oo magac barnaamijka "dadka maqan" ee idaacadda BBC qeybteeda Af Soomaaliga oo ay ku jirto ururinta kiisas cusub oo ah raadinta wajiga.
- **3,380** wadahadal taleefoon ah ayaa la fududeeyay, oo la socoto qeybinta buskutka BP-5 iyo dhalooyinka biyaha nadiifiya ayaa la gaarsiiyay muhaajiriinta kuwooda nugul ee marinka socdaalka bariga.
- Kooxo ka tirsan Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed qeytiisa soo celinta xiriirka qoyska ayaa lagu qalabeeyay agabka nadaafadda, oo ay ku jiraan saabuunta gacmaha buufiska jeermis dilaha ah oo loogu talo Taabletyada iyo taleefannada.
- Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed ayaa ka sameeyay qiimeynta soo celinta xiriirka qoyska **18** ka mid ah xerooyinka barakacayaasha oo ay ku noolyihiin **8,620** qoys gudaha Moqdishu.
- **4** wicitaano nooca muuqaalka ah ayaa la fududeeyay oo dhexmaray qoysas Soomaaliya jooga iyo **2** maxbuus oo dibadda ku xiran.
- **10** farriimaha aqbaarta qoyska ah oo loogu gudbiyay qoysaska maxaabiista taleefoon, **2** farriimaha ICRC-da ah ayaa la is dhaafsaday,iyo **4** ogeysiisyo ah ayaa loo sameeyay muwaadiniinta ajnabiga ah wakiiladooda diblomaasiyadeed iyo **1** loo sameeyay Hey'adda Qaramada midoobay u qaabilsan Qaxootiga.

**KA JAWAABIDDA CAABUQA COVID-19**

- **300** oo ah boorar ay ku qoranyihiin farriimo muhiim ah oo ku saabsan ka hortagga faafitaanka caabuqa ayaa loo qeybiyay degsiimooyin ay daganyihiin tiro badan oo muhaajiriin ah oo ku kala sugan Berbara, Boosaaso iyo marinka socdaalka bariga.

## HUBINTA XISAAB CELINTA DADKA DHIBAATADU GAARTAY

**Xarunta Xiriirka Bulshada (373):**



- Isugeyn **3,801** farriimo ah ayaa la helay lagan shaqeeyay iyada oo loo marayo nambarka bilaashka ah ee (373) meelo badan
- **60%** (**2,286**) ka mid ah jawaab celinta waxa ay la xiriirtay barnaamijka sugnaanta dhaqaalaha oo laga helay Gedo (**1,128**), Shabeellada Dhexe (**228**), Baay (**193**), Jubada Hoose (**166**),Hiiraan (**107**), Banaadir (**104**),Mudug (**103**), Galgaduud (**59**) iyo shabeelaha hoose (**43**), Bakool (**37**), iyo gobollada Waqooyi (**118**).
- **39%** (**1,513**) ka mid ah jawaab celinta waxa ay la xiriirtay barnaamijka daryeelka caafimaadka aasaasiga ah waxaana laga helay Gedo (**325**), Bakool (**218**), Banaadir (**59**), shabeellada Dhexe (**172**), Hiraan (**164**), jubada Hoose (**161**), Shabeellada Hoose (**160**), Galgaduud (**136**), Baay (**114**), iyo Mudug (**04**).
- **1%** (**02**) ka mid ah jawaab celinta waxa ay la xiriirtay kor u qaadista nadaafadda biyaha iyo deegaanka waxaana laga helay Gobollada Shabeellada Dhexe iyo Mudug.

**KA JAWAABIDDA CAAABUQA COVID-19**

- **3,909** qof ayaa la siiyay macluumaad ku saabsan ka hortagga Covid-19 iyada oo loo marayo Xarunta Xiriirka Bulshada (373).
- Dabagalka dadka ayaa lagu sameeyay xarunta wicitaanka bulshada ICRC. **2,028** xiriir oo lala xiriirinayo **1,156** kiisas laga shakisanyahay ayaa lagu dabagalay Baydhabo, Buur hakaba, Qansaxdheere, Xudur, Deyniile, Gubadleey, Muqdisho, Kaxda, Cadaado, Dhuusamareeb, Galinsoor, Baardheere, Ceel waaq, Balad xaawo, Baladweyne, Buulo burde, Jalalaqsi, Kismaayo, Afgooye, Marko, Balacad iyo Jowhar.

## FAAFINTA AQOONTA IYO KOR U QAADISTA MABAADII'DA BANI'AADAMNIMADA IYO IHL

- In ka badan **7,000** oo ah hogaamiyeyaasha bulshada, haweenka, dhalinyarada, ka faa'iideystayaasha iyo mutadawiciin ka tirsan SRCS ee gobolada Hiraan, Baay, Bakool, Sool, Sanaag, Bari, Mudug iyo Gedo ayaa lagu wacyi galiyay mabaadii'da aasaasiga ah laguna wargaliyay howlaha iyo barnaamijyada ICRC iyo SRCS.
- **195** oo ah xubno ka tirsan ciidamada qalabka sida, kuwa amniga iyo booliska ayaa la baray sharciga caalmiga ah iyo mabaadii'da baniaadamnimada.

ICRC waxa ay caawisaa dadka oo dhan oo ay saameeyeen colaadaha hubeysan iyo xaaladaha kale ee rabshadaha, iyada oo sameyneysa wax kasta oo ay awooddo si ay u ilaaliso sharaftooda, ugana yareyso dhibaatadooda, iyada oo kaashashaneysa saaxiibada Laanqeyrta cas iyo Bisha Cas. Ururku waxa uu kaloo doonayaa in uu ka hortago dhibaatada isaga oo dhiirrigalinaya oo xoojinaya sharciga bani'aadamnimada iyo iyaga ooh hor kacaya mabaadii'da bani'aadamnimada ee caalamiga ah.

**ICRC Somalia Delegation**
Denis Pritt Road
P.O. Box 73226 - 00200
T +254 20 2719 301
Nairobi, Kenya

ICRC offices in Mogadishu, Kismayo, Garowe, Baidoa, Jowhar, Guricel and Hargeisa.
www.icrc.org
© ICRC, August 2021

ICRC

facebook.com/ICRCAfrica
twitter.com/ICRC_Africa
https://www.instagram.com/icrc_somalia/
blogs.icrc.org/Somalia

Reference Number